Reset

Department of Labor and Industry
Workers' Compensation Division
651-284-5032 ama 800-342-5354

# Xuquuqaha iyo Waajibaadka Soo-kabashada ee Shaqaalaha Dhaawacmay

IW05

Ku qor adigoo isticmaalaya qalinka ama ku qor si elektaroonik ah
Geli taariikhaha adigoo isticmaalaya qaabka MM/DD/YYYY

HA ISTICMAALIN BOOSKAN

| Lambarka WID ama Lambarka Bulshada (SSN) | Taariikhda Dhaawaca |
|---|---|
| Magaca Shaqaalaha | |

Ujeeddada soo-kabashada xirfadeed ee hoos timaada Xeerarka Gobolka Minnesota § 176.102 waa in lagu caawiyo si aad ugu noqoto shaqadii hore, shaqo la xiriirta shaqadaadii hore, ama shaqo kale oo ka mid ah meel kale oo shaqo. Shaqadu waa inay ahaataa mid si jidheed ugu habboon islamarkaana keenta heer dhaqaale oo ugu dhow heerka aad heli lahayd haddii aadan naafo noqon.

Tallaabada ugu horreysa ee habka dib-u-noqoshada shaqada waa la-talin soo-kabasho oo ah kulan fool-ka-fool ah ama taleefan lala yeesho lataliye soo-kabasho oo aqoon leh (QRC), si loo ogaado inaad u qalanto adeegyada soo-kabashada. Haddii QRC uu go'aamiyo inaad u qalanto, tallaabada xigta waxay noqoneysaa horumarinta qorshe soo-kabasho. QRC-gaaga ayaa kaa caawin doona inaad horumariso oo aad fuliso qorshahaan, wuxuuna kuu sharixi doonaa adeegyada soo-kabasho ee laguu heli karo. Waxaa si gaar ah loo tixgelin doonaa shaqadaadii hore, celceliska mushaharkaaga toddobaadlaha ah, suuqa shaqada ee hadda, iyo kartidaada, oo ay ku jiraan xirfadaha laga faa'iideysan karo, taariikhdaada shaqo, da'daada, waxbarashadaada iyo danahaaga.Looma qaadi doono wax lacag ah adeegyada soo-kabashada.

---

## Xuquuqaha Shaqaalaha Dhaawacmay

***Hoos waxaa ku yaala sharciga magdhowga shaqaalaha ee Gobolka Minnesota, waxaad leedahay xuquuq la xiriirta soo-kabashada xirfadeed.***

- Waxaad heli kartaa liiska lataliyeyaasha soo-kabashada ee la diiwaangeliyay (QRCs) ee deegaankaaga adigoo booqanaya website-ka waaxda: www.dli.mn.gov/WC/QrcData.asp. Si aad u hesho la-talin soo-kabasho, shirkadda caymiska ayaa kuu diri karta QRC ama adigu waad dooran kartaa mid adiga kuu gaar ah. Haddii aadan adigu dooran QRC-ga kulanka la-tashiga, waxaad xaq u leedahay inaad codsato mid kale muddo ilaa 60 maalmood ah kadib marka la gudbiyo qorshaha soo-kabashada. Waxaa laga yaabaa inaad marar kale oo dheeraad ah isbeddel sameyn karto; wac Waaxda Xallinta Khilaafaadka (ADR) lambarka (651) 284-5032 ama 1-800-342-5354 si aad u hesho xog dheeraad ah.

- Marka QRC uu kugu horreeyo ama kuu soo qoro si uu kuu soo xariiro, waxaa laga rabaa inuu si qoraal ah kuu shaaciyo xiriir kasta ama dan lahaansho uu leeyahay isaga (ama shirkadda QRC) iyo shaqo-bixiyahaaga, shirkadda caymiska magdhowga shaqaalaha ama shirkad kasta oo xallisa sheegashada caymiska. QRC-ga waxaa kale oo laga rabaa inuu si qoraal ah u shaaciyo xiriir kasta oo la xiriira ganacsi ama dirisnimo, ha ahaado mid la caddeeyay ama aan la caddeyn, ee ka dhexeeya isaga (ama shirkadda QRC) iyo dhinacyada kale ee kiiska, sida qareennada ama dhakhaatiirta.

–

- Qorshaha soo-kabashada xirfadeed wuxuu ka koobnaan karaa tababar iyo/ama waxbarasho rasmi ah.

- Waxaad codsan kartaa in la beddelo qorshahaaga soo-kabashada.

- QRC-gaaga wuxuu u baahan yahay oggolaanshahaaga si uu u tago, u jadwaleeyo ama u baajiyo ballamaha caafimaad; si uu ula hadlo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee kugu saabsan; ama si uu u helo rikoodhadaada caafimaad.

- Waxaad xaq u leedahay inaad kala noqoto oggolaanshahaas QRC-ga si uu u tago, u jadwaleeyo ama u baajiyo ballamaha caafimaad; ula hadlo bixiyeyaasha daryeelkaaga caafimaad; ama u helo rikoodhadaada caafimaad.

- QRC-ga waxaa waajib ku ah inuu nuqullo kaa siiyo qorshahaaga soo-kabashada, warbixinaha loo baahan yahay ee soo-kabashada iyo diiwaannada horumarka, oo ay ku jiraan dhammaan qoraallada uu diyaariyay ama helay QRC-ga, adiga iyo dhammaan dhinacyada iyo qareennada kiiska. Diiwaannada horumarka waxaa loo diraa shaqo-bixiyaha kaliya haddii uu si gaar ah u codsado.

(Dhamaad

| Lambarka WID ama Lambarka Bulshada (SSN) | Taariikhda Dhaawaca | Magaca Shaqaalaha |
|---|---|---|
| | | |

IW05

- Waxaad xaq u leedahay inaad ka codsato caawimaad Waaxda Shaqada iyo Warshadaha (Department of Labor and Industry) marka ay timaaddo adeegyada soo-kabashada iyo arrimaha kale ee sheegashada. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan adeegyada soo-kabashada xirfadeed, wac Waaxda Xallinta Khilaafaadka (ADR) lambarka (651) 284-5032 ama 1-800-342-5354. Haddii ay dhacdo khilaaf ku saabsan u-qalmitaankaaga adeegyada sharciyeed ee soo-kabashada ama qorshaha soo-kabashada, waxaad gudbin kartaa foomka Codsiga Soo-kabashada (Rehabilitation Request), waaxduna waxay u qorsheyn kartaa kulan maamulka si loo xalliyo khilaafkaas..

## Waajibaadka Shaqaalaha Dhaawacmay

***Hoos waxaa ku yaala sharciga magdhowga shaqaalaha ee Gobolka Minnesota, waxaad leedahay waajibaad la xiriira soo-kabashada xirfadeed.***

- Waa inaad si daacadnimo leh uga qayb qaadataa fulinta qorshahaaga soo-kabashada. Haddii aadan si wanaagsan uga qayb qaadan, waxay keeni kartaa in la hakiyo ama la joojiyo faa'iidooyinkaaga magdhowga shaqaalaha.
- Waa inaad QRC-gaaga iyo shirkadda caymiska u sheegtaa mushaharkaaga, saacadaha aad shaqeyso, magaca shaqo-bixiyahaaga iyo jagadaada marka aad shaqo ka bilowdo meel kasta, iyo sidoo kale marka mushaharkaaga ama saacadahaaga ay is beddelaan. Tani waa muhiim si si sax ah loo xisaabiyo faa'iidooyinka khasaaraha mushaharka iyo si loo hubiyo in adeegyada soo-kabashada ay ku habboon yihiin. Haddii aadan si sax ah u warbixin mushaharka aad kasbatay inta aad heshay faa'iidooyinka magdhowga shaqaalaha, waxay keeni kartaa ciqaab madani ah ama mid dambiyeed.
- Waa inaad la shaqeyso baaritaannada caafimaad iyo qiimeynta la xiriira soo-kabashada ee macquulka ah ee uu faray guddoomiyaha ama xaakinka magdhowga. Haddii aadan u hoggaansamin, waxay keeni kartaa in faa'iidooyinka magdhowga shaqaalahaaga la joojiyo ama la hakiyo.

## Shaacinta

Qoraallada hoose waxaa loogu talagalay in lagu xaqiijiyo haddii laguu gudbiyey dukumentiyada ku xusan iyo in macluumaadka ku jira foomkan laguu sharxay. Lagaa ma rabo inaad bixiso macluumaadka hoose lagu codsaday ama inaad saxiixdo foomkan. Faa'iidooyinkaaga magdhowga shaqaalaha laguma saameyn doono haddii aad doorato inaadan bixin macluumaadkan ama inaadan saxiixin foomkan. Foomkan waxaa lagu keydin doonaa Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota waxaana sidoo kale loo diri karaa Xafiiska Dhagaysiga Maamulka iyo hay'adaha sharciga fuliya.

**Shaqaalaha, sax dhammaan inta khuseysa:**

☐ Macluumaadka kor ku xusan waa la ii sharxay waxaana la ii siiyay nuqul foomkan ah.

☐ Waxaan ka helay QRC ogeysiis qoraal ah oo shaaca ka qaaday: 1) wax xiriir ah, dan lahaansho, ama heshiis dirisnimo ganacsi — ha ahaado mid la caddeeyay ama aan la caddeyn — oo QRC-ga ama shirkadda QRC-ga ay la leeyihiin shaqo-bixiyaha, shirkadda caymiska magdhowga shaqaalaha, ama shirkad kasta oo qabata adeegyo caymis ama xallin sheegashooyin; iyo 2) xiriir kasta, dirisnimo ganacsi ama heshiis kale oo lala leeyahay dhinac kale, qareen, ama bixiye daryeel caafimaad oo ku lug leh kiiskayga.

☐ QRC-ga ayaa ii sheegay in isaga iyo shirkaddiisa aysan laheyn wax xiriir, dan lahaansho, dirisnimo ganacsi ama heshiis kale oo ay la leeyihiin cid ka mid ah dadka kor ku xusan.

| Saxiixa Shaqaalaha | | | | Taariikh |
|---|---|---|---|---|
| Saxiixa QRC | QRC # | Taariikh | Saxiixa Kormeeraha Intern-ka QRC | Taariikh |

QRC-ga waa inuu saxiixaa foomkan oo uu taariikhda saaraa kulanka ugu horreeya ee fool-ka-fool ah ama mid taleefan ah ee lala yeesho shaqaalaha. Nuqul foomkan ah waa in la siiyaa shaqaalaha, shirkadda caymiska, waxaana loo gudbiyaa Waaxda Shaqada iyo Warshadaha 14 maalmood gudahood laga bilaabo kulanka ugu horreeya ee fool-ka-fool ah ama taleefan.

Qof kasta oo si ula kac ah u helo faa'iidooyinka magdhowga shaqaalaha iyadoo aan xaq u lahayn — isagoo si ogaal ah u baddalaya, u sheegaya si khaldan ama aan shaacin xaqiiqo muhiim ah — waxaa lagu eedeyn karaa xatooyo waxaana lagu xukumi karaa sida ku cad Xeerka Minnesota § 609.52, qodob-qeybtiisa 3.

***Qoraalkan waxaa lagu heli karaa qaabab kale sida daabacaad weyn, Braille ama maqalka codka. Si aad u codsato, wac (651) 284-5032 ama 1-800-342-5354.***